## GOLAHA WAKIILADA JSL

# WARBIXINTA KORMEERKA XILDHIBAANADA GOBOLKA SOOL EE WADA TASHIGA ARIMAHA DEEGAANKA

Submitted date by_____

## 1. Hordhac

Taariikhdu markay ahayd 19/04/2012 ayaa waxaa kormeer balaadhan oo mudo Shan cisho ah qaatay ku galaabixiyey gobolka Sool koox ka tirsan xildhibaanada Golaha Wakiilada JSL waxaana kormeerkani uu daba socdey mid ka horeeyey oo ku saabsanaa u kuurgal xaga deegaanka oo ay koox xildhibaano ahi kusoo mareen Gobolka Awdal,kormeerkan oo ku saabsanaa in warbixin guud laga helo Deegaankaanka wadatashina lala sameeyo dadyowga ku nool deegaanka Gobolka Sool waxaana kormeerkan ugu muhiimsanaa u kuurgalka xaalufinta lagu hayo Dhirta iyo duur-joogta.

Ujeedada kormeerkan ayaa waxaa ay salka ku haysaa curinta ay Guddida Deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah ee Golaha Wakiiladu curinayso ama ay gacanta ku hayso sadex xeer oo kala ah:-

- Xeerka Guud ee Deegaanka (National Environment Act)
- Xeerka Kaymaha iyo Duurjoogta (wildlife and Forestry Act)
- Xeerka Maaraynta Qashinka Adkaha ah (Solid Waste Management Act)

Hadaba socdaalkan oo ay abaabulkiisa lahayd Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah ee golaha wakiilada JSL ayaa waxaa taageeraayey Hay'ada **IRI** taas oo xildhibaanada ka taageereysey wixii logistics ah.

Xildhibaanada u anbabaxay Gobolka Sool oo tiradoodu ahayd 4 xildhibaan ayaa waxaa ay xogwaraysigooda ka bilaabeen magaalada GAATAMA taasoo oo kala qaybisa Gobolada Togdheer iyo Sool ama Togdheer iyo Gobolka cusub ee Saraar, waxaana ay xildhibaanadu socdaalkooda ku gaadheen dhinaca bariga ilaa jiida degmada Yagoori ee Gobolka Sool,dhinaca galbeedka waxaa ay ka bilaabeen Tuulada Higlo, dhinaca Waqooyigana ama Saraarta waxaa ay gaadheen tuulada lagu magacaabo Bali-caraale.

Hadaba intii ay xildhibaanadu deegaanka baaxadaa leh ee Gobolka Sool ay marayeen oo ay socdeen qiyaas dhan 1200KM waxaa ay xogwaraysi kala yeelanayeen dadyowga

ku nool deegaankaas arimaha deegaanka oo ay ugu horayso xaalufinta dhirta iyo daaqa.

Hadaynu wax kazoo qaadano jaawabihii ay dadku ka bixinayeen arimaha deegaanka ayaa waxaa kamid ahaa kuwan soo socda oo ay xildhibaanadu waraysi kala yeesheen arimaha deegaanka waxaana kamid ahaa hadaladoodii.

Arimaha ugu xun ee xaga deegaanka ah ee ay ka cowdeen dadweynaha Gobolka Sool waxaa ugu muhiimsanaa .

- Dhulka oo lakala xidhanaayo(Seerayaal) taas oo dhibaato weyn ku haysey dadka dhulkaa ku noolaa iyo xoolahaba.
- Dhuxulaysi ba'an oo lagu hayey dhirtii deegaankaas ilaahay ku beeray taas oo ay ka siman yihiin dhamaan goboladda Somaliland.
- Baabuurta marta wadooyinka rafka ah oo deegaanka dhibaatooyin balaadhan ku haya marka ay sameeyaan wadooyin is barbar yaacaya.

Waxaan intaa kasoo  qaadanaynaa qaar kamida dhibaatooyinka deegaan ee Gobolka Sool iyada oo aynaan halkan kusoo koobi Karin dhamaantood.

## 1. UJEEDOOYINKA KORMEERKA

Ujeeddada kormeerkan balaadhan ee Xildhibaanadu ku tageen ayaa wuxuu ahaa ama salka ku hayey:-

1. U kuur galka ama xogogaal u noqoshada xaalada Gobolka Sool gaar ahaan Nabaad-guurka,Xaalufinta, Garaacista,Dhuxulaysiga iyo dabar-goynta dhirta iyo ugaadha lagu hayo.
2. Saamaynta dhaqan-dhaqaale ee  ay yeelatay kadib markii ay arimahas aan sare kusoo sheegnay dheceen iyo sidii wax looga qaban lahaa shacab iyo dawladba.
3. Wadatashiga Deegaan ee guud ahaan dadka ku nool Miyi,Tuulo iyo Magaaloba taasoo ay xildhibaanadu fekedehooda ka dhegeysteen in ka badan 100 qof oo ku nool deeggaanka Gobolka Sool.

4. U goggol xaadhida iyo in loo helo aragti midaysan oo ka timid qaybaha kala duwan ee bulshada ku kala nool Gobolada ay ka koobantahay Jamhuuriyada Somaliland taas oo lagu saleeyo sadex Xeer oo Xildhibaanadu gacanta ku hayaan kuwaas oo kala ah:

   - National Environment Act (Xeerka Guud ee Deegaanka)
   - Wildlife and Forestry Act (Xeerka kaymaha iyo Duurjoogta)
   - Solid Waste Management Act (Xeerka Qashinka Adkaha ah)

5. Ugu danbayn in Xildhibaanadu ay u guntadaan sidii Deegaanka loo badbaadin lahaa loona daryeeli lahaa Shacab iyo Dawladba.

## 2. WAXYAABAHA LAGA REJEYNAAYEY INAY KASOO BAXAAN

1. In Xildhibaanadu ay soo arkeen deegaanka warna ka hayaan waxa ka socda dhulkii ay indhahooda kusoo arkeen (awareness).
2. Qodoba lagu soo kordhiyo Xeerarka ay xildhibaanadu wadeen kuwaas oo ka imaanaya Qaybaha kala duwan ee bulshada.
3. Wada tashi balaadhan oo lala sameeyo bulshooyinka ku dhaqan dhulkaa xildhibaanadu soo mareen iyo wada shaqayn xildhibaanada iyo dadkooda dhexmarta.

## 3. DADKA IYO DHULKA BARTILMAAMEEDKA AHAA (target places).

1. Markasta waxaa awooda la saarayey in wax laga ogaado dhulka baadiyaha caadiga ah ee magaalada ka baxsan.

Xildhibaanadu waxaa ay waraysanayeen dadka reer guuraaga ah, kuwa dhuxulaysatada ah,kuwa xoolo raacatada ah iyo kuwa tuulo jooga ah ba.

## 4. DAREENKII DADKU KA BIXIYEEN XAALADA DEEGAANKA

Higlo

*"Magacaygu waa Hoodo Ciise Diiriye,dhulka aad looma garaaco beryo dhoweyd sidii loo garaaci jirey laakiin beero waa jiraan beerahana waxaan jeclahay in la baabiiyo dhulkan dhuxusha lagama gubo waa la ilaaliyaa oo dadka deegaanka degan ayaa dhulkan dhuxusha ka ilaaliya."*

Ceelka-Cali yaasiin

*“ Magacaygu waa Bile Diiriye Mushkilada ugu weyn ee na haysataa waa seerayaal waxaan leenahay cuna qabatayntaa ha laga qaado xoolaha oo dhulka ha lawada daaqo,waxaa taas ka daran dhuxulaysi ,mushkilada ugu weyn ee nahaysataa waa beeraha waxaan leenahay beerahaa aan cuntada kasoo baxayn ha nalaka dabar jaro, beryahan dhulkan dhuxusha waa laga daayey laakiin dhulkii saraar la odhan jirey gegi banaan ayaa laga dhigay ,hadii Seerayaan dawladeed oo dad ku u simanyahay la sameeyo xiliga xun baa lagu baxsanlahaa.”*

**Oog iyo Adhi-cadeeye dhexdooda**

**Yuusuf Diiriye Muuse**

*“waxaan idiin sheegayaa wixii aan naddartu u arkay, dhuxusha waxaan ku talin lahaa in la joojiyo waayo geedka damalka ah marka la gubo waxaa ku hoos nool ilaa 300 oo geed oo yar yar markaa ninka hal geed gubayaa ma gubaayo oo qudha hal geed, anigu waxaan ku talin lahaa in seerayaashii jiri jirey lasoo celiyo oo dhirta iyo xooluhu ku baxsan lahaayeen sidaa daraadeed waa in kuwaas lasoo celiyaa”.*

**Oog**

**C/naasir C/salaam**

***“****hadaan u gudbo deegaanka iyo xaalufka intii tamartayada ah dadka waanu ka wacyi gelinaa hada magaalada wasaarada deegaanka cidi uma joogto sidii darted dadka uun baa dadaala laakiin lama ilaalin karo waa in xildhibaanadu xeerarka ku daraan qodobo tilmaamaya in wasaaradaha ku shaqada leh deegaanka ay tagaan dhamaan dhulka Somaliland oo ka hawl galaan, xaga caafimaadka waxaa noogu dhow magaalada Burco oo aanu caafimaadka u tagno,qashinka waxaanu u qodnay ilaa sadex god oo dadaal badan ayaanu u galay aniga iyo odayaasha degmada Oog.*

**Bali-Caraale**

**Cismaan Nuur Maxamuud**

*”deegaanka bali caraale waa ay jirtaa dhuxulaysi oo laba kaam oo dhuxulaysi ayaa deegaanka ka jira, taas waxaa nagaga daran garaac taasina waxay dhiiri gelinaysaa dhuxulaysiga waayo marka geedkii la garaaco waxaa dhacaysa inuu qalalo oo markaa ka faa’iideysto dhuxulihii oo halkaa dhirtii ka nabaad guurto markaa waxaa wanaagsan in wax laga qabto bahasha layidhaahdo Garaacda waxaana xoolaha loo garaacay xoolaha”*

Intaas waxaan kusoo koobeynaa qaarka mida dareenadii ay dadka reer Sool ka bixiyeen xaalada deegaankaasi ku suganyahay gaar ahaan xaalufinta lagu hayo dhirta iyo duur joogta taas oo nabaad guur ba’an ku sababtay dhul baaxad leh oo deegaankaas ka tirsan.

## 5. WAX YAABIHII LAGALA KULMAY KORMEERKA (CHALLANGES)

Deegaanka Gobolka Sool meelo kamida ayaa waxaa ka jirey xaalado gaar ah taasoo sababtay in aanay xildhibaanada dhamaan wada gaadhin Gobolka laakiin ay muunad fiican kasoo qaateen xaalada guud ee Gobolka Sool uu ku suganyahay .

Intii lagu guda jirey socdaalka xildhibaanada ee Gobolka Sool ayaa waxaa deegaankaas ka da’aayey roobab laxaad leh taasoo marmar ahayd carqabad siiba dhulka rafka (aan laamiga lahayn) ah waaya waxaa baabuurtii aanu wadaney mar naga gashay meesha layidhaahdo MUGUCA daba dharyood halkaas oo gurmad nooga yimid degmada Waridaad ayna baabuurtii nooga saareen.

## 6. SOOKOOBIDA DHIBAATOOYINKII UGU MIHIIM SANAA EE KA HAYSTEY GOBOLKA SOOL XAGA DEEGAANKA (priorities)

1. Baabiinta kaymaha
2. Duurjoogta oo si sharci daro ah loo musaafurinayo
3. Qashinka oo aan la habaynayn
4. Nabaad guur
5. Daabiyadaha/tuulooyinka oo soo badanayana keenayana saamayn deegaan
6. Shaqaalaha wasaarada deegaanka oo kuyar ama aan jirin Gobolka Sool
7. Dhuxulaysi ba'an oo deegaanka ka socda
8. Seerayaal lakala xidhay dhulkii xooluhu daaqi jireen
9. Wacyi gelin la'aan xaga deegaanka ah
10. Abaaro soo noq noqonaya
11. Jeex jeex yo dhulka kasamaysmaya
12. Dhibaato haysata daaqa yar yar ee xooluhu daaqaan

## 7. GEBO-GEBEDII SOCDAALKA

Ugu danbayntii waxaa ay xildhibaanadu xaflad balaadhan kaga qayb galeen hotelka Oog Plaza ee magaalada oog taas oo ay qaban qaabadeeda sii wadeen qaarkamida shaqaalaha Hay'ada IRI iyo Golaha Wakiilada waxaana kulankaas lagaga dooday dhibaatooyinka deegaan ee haysta Gobolka Sool iyo sidii lagu xalin lahaa iyo wixii ay reer Sool kusoo biirin lahaayeen xeerarkaa la wado.

Magacyada Xildhibaanada

1. Xil: Ibraahim Axmed Raygal
2. Xil: Axmed Ducaale Bulaale
3. Xil:Maxamuud Dhunkaal Guutaale
4. Xil:Xariir Siciid Bulaale

Report Writer: Mubarik Farah Warsame

Staff of Somaliland House of Representatives